# Soo-koobidda Kaalmada Dhaqaale ee Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange (Children's Hospital of Orange County, CHOC)

Children's Hospital of Orange County waxa ka go'an inay daryeel caafimaad iyo gurmad tayo leh siiyaan dhammaan bukaanada iyada oo aan loo eegayn xaaladda maaliyadeed ee bukaanka. Haddii aadan haysan caymis daryeel caafimaad, waxa laga yaabaa inaad u qalanto mid ka mid ah qorsheyaasha caymiska caafimaadka dowladdu bixiso ama waxaad u qalmi doontaa inaad caymis ka gadato Iswaydaarsiga Caymiska California (Covered California Health Exchange). Macluumaadka ku saabsan waxyaabaha caymisku daboolayo waxa laga heli karaa: www.coveredca.com. Covered California waxa sidoo kale u jooga dad lagu tababaray inay kaa caawiyaan codsiga caymiska. Wixii kaalmo ah la xiriir Children's Health Initiative of Orange County 1505 E 17th St Suite 121 Santa Ana, CA 92705, Lambarka taleefan: 714 619-4050. La-taliyaha Kaalmada Dhaqaalaha ee CHOC waxay halkan u joogaan inay kugu caawiyaan macluumaad ku saabsan u qalmitaanka barnaamijyada dowladda sida Medi-Cal iyo CCS. Fadlan wac 714 509-4981.

Bukaanada buuxiya shuruudaha loo dejiyay Barnaamijka Kaallmada Dhaqaale (FAP) waxay u qalmi karaan qiimo-dhimis 50% illaa 100% ah biilashooda CHOC. Qoysaska la xaqiijiyay inay joogaan 400% ama ka yar ee Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL) waxay biilkooda CHOC ku helaan qiimo-dhimis 100%. Si ay daryeel deeq ah u bixiyaan, CHOC Children's waxa sharcigu ku waajibinayaa inay tixgeliyaan qaddarka guud ahaan lagu dallaco dadka haysta caymis daboolaya xaaladaha degdeg ah ama adeegyada daryeelka caafimaadka lagama maarmaanka ah ("Qaddarka Guud ahaan Lagu Dallacay" ama "AGB") iyo inay dammaanad qaadaan in bukaanada hela daryeelka deeqa ah aanay adeegyada caafimaadka lagama maarmaanka ah ku bixin wax ka badan AGB.

Heerarka Saboolnimada Federaalka ee dhowaan la daabacay ayaa loo adeegsan doonaa in lagu qiimeeyo qoysaska u qalma Qorshaha Kaalmada Dhaqaale ee CHOC. Dukumeentiyada dhaqaale, sida xogta canshuur celinta ee hadda, xaqiijinta dakhliga, sida waraaqaha dhaqdhaqaaqa bangiga ayaa loo baahan karaa si loo go'aamiyo u qalmitaanka.

Qoysasku waxay heil karaan nuqulka codsiga CHOC FAP oo ku qoran af Ingiriisi, Carabi, Faarisi, Kuuriyaan, Maandariin, Soomaali, Isbaanish, Tagalog, ama Fiitnaamiis adigoo Xarunta Lacagbixinta Qoyska ee CHOC ka wacaya barta 714 509-8600. Wakiilka Xarunta Lacagbixinta Qoyska wuxu kaalmeyn karaa fahamka nidaamka sida loo buuxinayo codsiga FAP. Qoysasku waxay sidoo kale heli karaan codsiga CHOC FAP iyagoo booqanaya websaydka CHOC Children's ee barta CHOC.org.